RESET
Training and Support

# Khabiirada oo Khibradda leh: Dib u dejinta waalidka keligiisa ah

Akhriso wareysigeena aan la yeelanay Rana, oo si cad ugu hadashay dhibaatada ka jirta Suuriya oo looga soo tagaayo, iyo u safridda safarkaan waalidka keligiisa ah ay la socdaan labadeeda gabdhood.

Ka dhigitaanka safarka waddankaaga hooyo ilaa waddanka ku marti gelinaayo, oo ka dibna waddan kale dib u dejin ahaan, waa hawl adag oo qoys kasta maraayo – oona mid noqoneysa inay xitaa wax badan sii adkaato waalid keligiisa ahaan. Dammaanad qaadka halkaas waxaa jira awood u lahaanshaha inaad u jeediso lammaanahaaga xaalada noocaas oo kale, iyo inaad weydiiso su'aalahaas aadka u adag ee 'ma bixi karnaa?', 'maxaa nagu dhici doona anaga?', 'maxaan u sheegnaa carruurta?' – tani halkaas uma jirto waalidka keligiisa ah. Tani waxa waaye safarkii Rana ka hor inta aysan soo dhoweyn kooxda South Liverpool Churches Community Sponsorship sanadka 2019.

Rana si naxriis leh ayay nala fadhiisatay si ay uga hadasho khibradeeda ku aadan in la soo dhoweeyo oo ay taageeraan kooxda Community Sponsorship labadii sano ee la soo dhaafay, waxay nolosha u egtahay sida korinta labo gabdhood oo ah waalid keli ahaan, iyo waxa ay u rajeynayso qoyskeeda hadda waxay dareemaysaa inay degto UK.

## Maxay ahayd dhibaatooyinka inaad ka soo tagto waddankaaga hooyo ee Siiriya?

Waxaan ugu soo tagnay dagaal dartiisa. Markii iskuulka/dugsiga gabadhayda la duqeeyay oo labo ka mid ah asxaabteeda lagu dilay, ayaan ka argagaxay, Sidaas darteeda waxaan ka soo saaray gabdhaheyga dugsiyadooda oo waan ka soo tagnay Siiriya.  Waxaan ku dadaalnay inaan helno fiisa oo Ciraaq ah oo waxaan halkaas ku safarnay diyaarad.

## Sidde ahayd nolosha Ciraaq, gaar ahaan hooyo keligeeda ahaan?

Dhammaan dhinacyada ee nolosha halkaas, waxay ahayd mid aad iyo aad u adag. Ugu horeyntii, korinta labo gabdhood hooyo keligeeda ah oo nafteeda mas'uuliyad weyn saaran. Mida labaad, markaan aadnay Kurdhiish qayb ka mid ah ee Ciraaq, luuqadda halkaas looga hadlo way bedelan tahay. Anaga ma garaneyno luuqadda ama sida loola xariiro dadka. Arrinka sedexaad ee wuxuu ahaa dhinaka dhaqaalaha, sida loo sameeyo lacag ku filan qoyskeyga, gaar ahaan maadaamaa aan ahay halka qof oo keliya ee mas'uuliyadda saaran oo waxay ahayd go'aankeyga inaan u qaado gabdhaheyga Ciraaq.

Si aan Lacag u sameeyo Ciraaq, waxaan karin jiray cuntada oo waxaan ka iibin jiray qoysaska kale, oo sidoo kale waxaan Quraan ku dhigi jiray masaajidka. Markaan karinaayay cuntada, waxaan kariyaa cunnada isku dhafan, labadaba cuntada Ciraaq iyo Suuriyaanka. Dadka waxay iisheegaan sida ay u macaan tahay cuntadeyda, iyo inay weligooda dhadhaminin cunto teyda oo kale hadda ka hor. Way jeclaadeen oona wayna iibsadeen cuntadeyda, oo waa mid i caawisay inaan ku noolaado Ciraaq.

Gabadhayda igu weyn way joojisay inay dhagato iskuulka sababtoo ah ma aan awoodi karin isaga. Waxba ma sameyn karin sababtoo waxaan helo keliya waxay ku filnaayeen inaan ku bixiyo kirada iyo cuntada. Ma sameyn karin intaas wax ka badan. Ka soo tagidda waddaneyga waxaan noqday mid aad u murga, laakiin ma awoodin inaan siiyo gabadheyda waxbarashada ay u baahneed ayaa xitaa iga sii dhigay inaan wax badan murgoodo. Markay gabadheyda aragto ardeyda kale iskuul u socdaan, way oon jirtay oo waxay weydiineysaa inaan u keeno waxyaabaheeda sida boorsadda sidaas darteeda si ay iskuulka sidoo kale u aado. Markaan ka soo tagay Siiriya, ma aan hubin meeshaan u socono ama waxa nagu dhici doono anaga. Laakiin fikirkeyga woqtigaas wuxuu ahaa inay fiican tahay inaan weyno lacagteena iyo gurigeena, meshii aan ka weyn lahaa gabdhaheyga.

## Maxay saameyn ku yeelatay ka soo tagidda Siiriya gabdhahaaga?

Ka soo tagidda Siiriya waxay saameyn aad u xun ku yeelatay gabdhaheyga, sababtoo ah ma awoodi karin inaan siiyo nolol wanaagsan. Waxaan ku noolaan jirnay keliya ugu yaraan nolol iska dhexdhexaad ah. Gurigeen ku yaala Ciraaq waxuu lahaan jiray keliya waxyaabo daruuri ah oo ma awoodi karin inaan siiyo iyaga wax intaas ka badan. Sidoo kale, waxaan dareenay bulshida Kurdhiyiinta inay

na rabin meeshaan joogi jirnay. waxaan isku deynay inaan la saaxiibno dariskeena oo qaab saaxiibtinimo ahaan ah, laakiin ma eysan nooga jawaabin anaga. Xitaa ma u oggolaan jirin carruutooda inay la ciyaaraan carruurteyda.

Markaan ka fikiro woqtiyadaas, runtii way adag tahay. Laakiin waa sababta aan u imaaday halkaan. Iyo kooxda Community Sponsorship qaabab badan ayay igu caawiyeen, caafimaadka, waxbarashada, iyo sidoo kale waxyaabaha dukaameysiga cuntada. Oo waan la yaabay middaan, sababtoo ah waxay ahayd mid ka soo horjeedda Ciraaq halkaas oo dadka xitaa nooma soo dhowaan jirin anaga, meesha halkaan kooxda ay naga caawinaayeen wax walba.

## Sidee dareentay markii ugu horeysay ay kuu sheegaty UNHCR inaad dib u dejin ugu socotid ee UK?

Markii ninka taleefoonka iga soo wacay aniga oo dhahay in nalal aqbalay inaan aadno UK, Ilin ayaa iga soo daadatay. Waxaan ku dhacay ismiidka oo waxaan ku dhahay isaga 'fadlan ku soo celi waxaad dhahday, fadlan, bil axsaanik ku soo celi waxaad hadda dhahday'.

Marwalba waxaan dareemaayay in si uun la ii caawin doono. Waxaan in Allah naga tagi doonin keligeena, in qof noo soo diri doono oo na caawiyo. Iyo ma aan quusan karin gabdhaheyga dartooda, waxaan dareenay inaan wado dagaalka iyaga dartooda.

Ma aan dareemin wax welwel fikir ah inaan imaado UK. Waan qalan jebiyay, Waxaan bartay IT-ga iyo ganacsiga ee gudaha Siiriya. Iyo waxa aan ka maqlay UK, waxay ahayd inay ka mid tahay waddamada ugu fiican ee adduunka, waddan dadka u diraayo carruurtooda, si ay u helaan waxbarasho fiican. Sidaas dartteda, markaan maqlay inaan u socono UK, maskaxda waxaan ku haayay, fikirka wuxuu ahaa inaan u socono mid ka mid ah waddamada fiican. Oo waan la yaabay waddan sida UK oo kale ah inuu i aqbali doono aniga iyo gabdhaeyga.

## Maxay labada sano la soo dhaafay UK u ahaayeen sida qoyskaaga oo kale?

Waxay ahayd labada sano ee nolosheyda ugu fiicneed. Waxaan dareemay bilow inay tahay, sidoo kale nolosheyda inay mar kale bilaawatay.  Waxaan dareemay in waxwalba horseed u yihiin inaan halkaan u imaanay oo aan ka mid noqono UK iyo bulshadaani. Dadka halkaan waxay iila dhaqmeen sidii bin'aadannimo ah. Sidaan

horey u dhahay, dadka Ciraaq xitaa dib iima soo dhaheynin aniga nabadaa. Laakiin halkaan qof walba wuxuu illa dhaqmay sida bin'aadannimo.

Carqaladda ugu weyn ee deganaanshaha halkaan waxay ahayd caqabadda xaga luuqadda. Taasi waa sheyga keliya aan u arkay inay adagtahay. Waxaan dareemay waxwalba in la maamuli karo, oo taasna ay u wacan tahay ee kooxda Community Sponsorship. Xubnaha kooxda ayaa iga caawin doona aniga waxyaabaha kale duwan. Ruux ayaa iga caawin doonaa inuu i hagaajiyo ballamaha caafimaadka, iyo qof kale ayaa iga caawin doona maareynta dheefaha iyo wixii kale oo la mid ah. Waxaan dareenay dhammaan inaan nahay hal qoys oo weyn, dhamman xubnaha kooxda waxay i tusaayeen sida loo sameeyo waxyaabaha iyadoo tillaabo isku xiga ah.

Xitaa markaan u soo safraayey UK, waxaan ka fikiraaye inaan u baahanahay inaan u iibsado dhar gabdhaha. Laakiin markaan imaaday guriga halkaan, armaajada ayaaba marhore waxwalba ka buuxeen. Dharka iyo kobaha, waxwalba diyaar ayay ahaayeen oo anaga ayay nasugaayeen. Iyo markii iskuulka bilowday, kooxda waxay ii wadeen inaan u soo iibiyo gabdhaha labiska iskuulka. Markii laga reebo luuqadda wax kale ma dareemin inay adagt tahay ama dhib tahay, oo taasna ay u wacan tahay kaalmada ee kooxda.

Kooxda keliya managa caawineynin waxyaabaha daruuriga ah, laakiin waxay noo wadi jireen safarada dhismooyinka dhaadheer, makhaayadaha iyo wales! Waligeyga ma aan dareemin tani waxay u sameynayaan sababtoo ah inay tahay shaqadooda ama waajibkooda si ay sidaan u sameeyaan, laakiin dhammaan markaan baxeynay bannaanka waxaan u dareemay inaan saaxiibo iyo qoys nahay. Oo hadda waxay iga dhigtay inaan dareemo farxad si aan ugu fikiro taasi hadda inay tahay nolosheyda.

Iyo xitaa dareskeena aad bay noo jeclaayeen anaga, iyaga oo hadiyado nasiinayaan. Haddii dareskeyga uusan i arkin seddax ama afar maalmood, way isoo wici doontaa si ay i weydiiso haddii aan fiicanahay!

## Waa maxay rajooyinka aad leedahay ee mustaqbalka?

Waxaan jeclaan lahaa inaan awoodo inaan sameeyo oo aan barto kalkaalinim oo aan noqdo kalkaaliye. Waxaan jeclaan lahaa inaan furto meel yar oo rugta caafimaadka ah ee gudaha Liverpool oo aan halkaas isla shaqeeysno labadeyda gabdhood. Dadka ku nool Liverpool aad bay naxriis u leeyihiin, oo waxaan rabi lahaa inaan dib ugu celiyo iyaga qaab uun.

RESET
Training and Support

## Maxay kula tahay adiga kafaaladda bulshada?

Aniga, waxay ila tahay bilowgii nolosha cusub inay tahay iyo mustaqbal fiican. Kooxda ayaa naga dhigtay inaan markale dareeno inaan nahay bin'aadan oo waxay nagu dareesiiyeen sida aan ku helno wax kasta oo aan rabno.  Waxay dareemeen inay yihiin qosykeena. Weligood manoola dhaqmin sidii shasheeye oo kale ama si rasmi oo kale, laakiin sida qoyska oo kale.

Qoysas walba waxuu ka welwelay imaanshaha UK, waxaan ku dhihi lahaa iyaga inay dadka halkaan yihiin kuwa aad u fiican iyo naxriisba leh. Kooxda na soo dhoweysay anaga waxa ay ahaayeen kuwa aad noo dhiirigeliya oo aadna noo taageera. Kooxda ayaaba ka badbadisay wax kasta aan fileynay! Oo waxaan talo siin lahaa qoysas walba oo imaanaya inay runtii diiridda saaraan barashada luuqadda, sababtoo ah haddii aad leedahay xirfadaha luuqadda halkaan ka dib waad gaari kartaa waxaad rabto inaad hesho.

Kooxda waxay noo tahay anaga qoys weyn, waxaan dareemaynaa inay yihiin hadiyad xaga Alle nooga timid. Qof walba oo imaanaya UK waxaan u rajeynaa inay helaan qoyska noocaan oo kale ah.

*Waad ku mahadsantahay wadaagidda sheekadaada!*